WAXAA KU JIRA 800
OO MAAH-MAAHOOD
OO SOOMAALIYA

WAXAA SOO QORAY
JAALLE CABDI MIRE. CAL.

Proverbi raccolti da

# MAAH-MAAH SOOMAALI

(1) ADIGA OO HADHSAN WAAYEY, MA LAGUU HADH GALAY.

(2) ABEESO DHUL U EEKI BAY KUGU DISHAA.

(3) AABAHAY BAA FIICNAA, ANAA FIICAN BAA KA WANAAGSAN.

(4) AFAR MANJOOD NINKII DUUBAA, MID BUU YEESHAA.

(5) AYADAA WAA HOOYADAA AAN , NAASO LAHAYN.

(6) AMA WAA LA MUUQDAA , AMA WAA LA MAQANYAHAY.

(7) AMA GARTA FUR, AMA MARTA FUR.

(8) AABAHAA IYO HOOYADAA IYAMAA LA CADAABAA, AFKAAN KA KALA HAYAA.

(9) AFEEFI AABAHAA KA WEEN.

(10) ARAH LOO KALA EEG.

(11) AFAR REERKA AY KU KULANTAA, MA DHAQMO.( GABADH FOOL XUN, CURAD NACASA, HABAR CIRWEYN, IYO ODAY TALA XUN.

(1 ) AWR LABA LA SIISTAY, DHAL WANAAG KU FAAN MALE.

(13) ABAAL RAAGA RAG BAA LE, ABAAL SOO DHAKHSADANA,GEEL BAA LE, ABAAL BA'AYNA NAAGAA LE.

(14) AYEEYO KORISAY IYO ALLA KAA QAAD, WAA IYAMA.

(15) AYEEYO KORISAY, OORI MA NOQOTO.

(16) ABAAR LOOMA FAANO.

(17) ANIGU KU SHEEGIMAAYO, EE YAAN CAMALKAAGU, KU SHEEGIN.

(18) AYAX TEG EELNA REEB.

(19) ALLA MA YAQAAN, OO ANIGA IYAQAAN.

(20) ABAAL NIN GALAA WAA BADANYAHAY, NIN GUDAASE WAA YARYAHAY.

(21) AABAHAA AAN HOOYADAA QABINI, WAA ADEERKAA BADBEENAAD.

(22) AJI WAA NIN ILKO WAAYEY, IYO NIN AY IS KOR FUULEEN.

(23) AMA AFEEF HORE LAHAOW, AMA ADKAYSAN DANBE LAHAW.

(24) ADDUUN WAA HADH.

(25) AFXUMO COL IYO NABAD MIDNA MAAHA.

(26) AWR MIDGAAN GEEL AJUU KA DHASHAY.

(27) ANIGAABA WAALAA , OO WEEL HOOS U JEEDA WAX KU SHUBTAY.

(28) AWRYAAL NABAR UU OGYAHAY, KUMA GAGABO.

(29) ADHI JIRI MA KALA ABAAL WEYDO.

(30) AMAAN LAMA DHUDHUMIYO.

(31) AWR XAMILKII WAA QAADAA, XADHIG QALOOCANSE MA QAADO.

(32) AADANE LA ARAGYAABA , DHIB LA ARAG.

(33) AWR DABRANI MA DURDURIYO.

(34) AF MACAAN GACAN MACAAN BAA DHAANTA.

(35) AMMAANO KUGU RAAGTA YEDDAA BAAD MOODAA.

(36) AMMAANO CIRKAA DIIDEY, OO DHULKAA DIIDEY, OO AADANAA,QAATAY.

(37) AWR AWR WADO IYO NIN NAAGO WADAAN , MIDNA KAAMA BAYDHO.

(38) AD ADAYGNA LAGUMA WAARO, JILJILEECNA, LOOMA DHINTO.

(39) AMA LA DANBOW, AMA LA DOONOW.

(40) AROOS LAGAMANA RAAGO,LAGUMANA RAAGO.

## MAAH-MAAH SOOMAALI

(41) ALLA WATAA WEHEL MA DOONO.

(42) ABEESO FAR LOO TAAGAY, FANAXAY U BOODAA.

(43) ABEESADA LABA JIRKA KUGU QANIINTAA, LIXDAN JIRKAY KUGU SOO RIDAA.

(44) AGOON MADAXAA LOO SALAAXAA.

(45) AFKAAGA AAN HAFRIINYAHAY KAA RUGIN , LAYSKA GOO BAA LA YIDHAAHDAA.

(46) AF JOOGA LOOMA ADEEGO.

(47) AF WAX CUNAY XISHOO.

(48) ADDUUN WAA LABA DHOGOROODLE.

(49) ALLOW AAN WAAGA WARAABE , CUNIN.

(50) AWLIYO ALLA IYADAA IS AF TAQAAN.

(51) AJI FAL DHIMAN, LAMA TUSO.

(52) AMA HAL ISII AMA HAL IIDHEH.

(53) AJI QAAN LIHI , MA QUDHMO.

(54) ABURKU CANDHUUFTA INTAANU, KUGU TUFIN BAA LAGU TUFAA.

(55) AWELBA ANIGA OO GOYAYAA , WEYLINA IGU JOOGSATEY.

(56) AMMAANI, AMAAH MA GASHO.

(57) ARBA SEBEN BUU DHAAMIYAA.

(58) AABAHAYNA MINDHICIRKII BUU HIBANAYAA, HOOYADAYNA, SARARTII BAY KU DARSATAY.

(59) ABTIGAA WAA KUU GOYAA, EE KUUMA AARO.

(60) AF LIBAAX BEENI KAMA DHALATO.

(61) AWRKA [illegible] BANBE, AWRKA HORE , HOGAAN QAABKIISUU YEESHAA.

# MAAH-MAAH SOOMAALI

(62) BIYO MEEL GODAN BAY ISUGU TAGAAN.

(63) BIYO KAA BADAN IYO FARO KAA BADANIBA WAA KU HAFIYAAN.

(64) BELAAYO DAAMAN LA QABTO BAY LEEDAHAY, EE DABO LA QABTO MALE.

(65) BIL SADDEX GURIGAAGANA WAA KAA KAXAYSAA, GURI KALENA KUMA GEYSO.

(66) BARUURABA BARUUR QUDHAA QUDHMISA.

(67) BAROORTU CEESAANTA KA WEYN.

(68) BADAWI BARAKO MALE.

(69) BARTI YAQAAN BARI UMA KORODHO.

(70) BAADI DAWADEEDU WAA LA HEL.

(71) BAADIYI NIN AAN LAHAYN BAY AG JOOGTAA.

(72) BAHAL B HIGLO AF QUDHMUUNA KUMA KALA TAGTO, AF UDGOONA KUMA WADA JOOGTO.

(73) BOORAAN HADIMO HA QODIN, HADDAAD QODANA, HA DHEERAYN, KU DHICI DOONTEENA MOOYIYE.

(74) BALAN HABEENIMO JARMAADO SUBAXNIMUU YEESHAA.

(75) BALAN DARO WAA DIIN DARO.

(76) BARYO BADAN IYO BUKAAN BADANBA WAA LAYSKU NACAA.

(77) BAL WOXOO DAY, IYO WAXA KA SOKEEYA DAY.

(78) BELAAYO LOOMA BAAQO.

(79) BELAAYO MARKA AY MEEL AY KUUSOO MARTO WEYDO, KAC OO GUUR BAY KU TIDHAAHDAA, AMA KAC OO GUURSO.

(80) BELAAYO INTA AY ADIGA KAA MAQANTAHAY, ASAAGAA BAY KU MAQANTAHAY.

(81) BAAYAC MUSHTAR WAXA UU KUSIIYO, HABARTAANA KUMA SIISO.

(82) BELAAYO MARKA AY REER ODAY KAAGA DHIGTAA, BAY KUUGU DARANTAHAY.

(83) BELAAYO KUGU SOO BEEGAN LAYSUMA BALAADHSHO.

(84) BAWDO RAG MAALINBA MID BAA QAAWAN.

(85) BIYO FADHIYA BIYO SOCONAYAA KICIYA.

(86) BARASHO HORTEED HAY NICIN.

(87) BAHOII DIIDE, BAHAL BAA CUNA.

(88) BEEN WAA LAGU DHERGAA 7, LAGUMASE RAKAATO.

(89) BAD NIN DHURAY, BIYAHA KAMA DHAMEEYO.

(90) BARUURI KMM KULAMA DHALAN.

(91) BEENI RAAD MALE.

(92) BEENLOW MARAGIISUU FOGEEYAA.

(93) BADH BADHAADHAY OO LAYGA QUUSAY.

(94) BIYO ODAY BAA LEH.

(95) BIRTUBA WAINA KALA GARAN.

(96) BIDDANA GARTIISA WAA LA NAQAA.

(97) BAHAL HADDUU KU CUNAAYO, KAN KU XIGAA HAKU CUNO.

(98) BOQOL SOON BAKHTI KUMA AFURO.

(99) BAKHTI BAAHI LOOMA CUNO.

(100) BAQAL FARDO LA MIRATAY, KA MID BAY ISMOODAA.

(101) BAAHIYI NIN KUU DARAN BAY KUU GEYSAA.

(102) BEEN FAKATAY, RUNI MA GAADHO.

(103) CIDLI CEEBTAADA MA SHEEGTO.

(104) CAANO NINKII LISAY LA OGYAHAY, NIN KASTAABA HA KBENO.

(105) CUNTO DULI HADDAAD KA TAGTO, MID XURMO LE BAAD HESHAA.

(106) CAANOW WAAN IDIN JECLAAYE, MARKAAD CANDHO DAMEERAAD GASHEEN BAAN IDIN NACAY.

(107) CALAACAL HADHAN.

(108) CAYDHI AMA HABEEN SOCOTAY AMA MAALIN.

(109) CAWSHA NEEFKA UGU TAAG DARAN BAA UGU HOR ORDA.

(110) CAYDH IYO CEEB.

(111) COLKA WADHAF MA LAGU DEYEY.

(112) COD GARAAD KA SOO BAXAY, WAA CAD KAA BAXAY.

(113) CAANO DAATAY, DABADOODAA LA QABTAA.

(114) CARAB DALABLE ADIN DALAB LE WAA LAGA ARKI OGYAHAY.

(115) CEEL DAD LIQA UL BAA LAYSKAGA DAYAA.

(116) CAANO JIILAAL CANBA CAN BID.

(117) CARUURI HADDAY KUFTANA WAA OYDAA, HADDAAD KUFTANA WAY QOSOSHAA.

(118) CADOW KUMA QABTO KUMABA ARKO BAA KA WANAAGSAN.

(119) CIIRTAA DHAMAA CEEBTAA YAQAAN.

(120) CARAABABA FADHAA QUUSIYEY.

(121) CARAB IYO LABA DAAN BAA ISUGU DHOWOO WAA IS QANIINAAN.

(122) CALAF YAR IYO CIIDAN YARDA MARKII LA WAAYAA, LA TABAA.

(123) CIR DULAL LE.

(124) CADAWGAA CUDUDAA LOO BUURAA.

(125) CAADO LA GOOYAA, CADHO ALLAY LEEDAHAY.

(126) CALOOL LA QUFI DOONO LOOMA QOONQOONBIYO.

(127) CAG WEYNOW, CIR WEYNOW OO CAADH WEYNOW WAA CEEB ADDUUNKA AH.

(128) CARUURI GAALO IYO MUSLIM HADBA KII LAGU DARAA BAY RAACDAA.

(129) CEEL BIYA YARODDA MIILAA LAGAGA CABBAA.

(130) CEEL NIN GALAY BAA LAGA WARAYSTAA.

(131) CIDLI CIIRSI MALE.

(132) CIRKU HADDII UU BI'ID MAAGO, LAFTAA BADISA.

(133) COLKU WAA SADDEX ( COL MADOW, COL CAD, IYO COL CAS.

(134) CEEBTAA KOWGAA OGYAHAY, KUNKAA LAMA OGEYSIIYO.

(135) CAD KU CEEJEY, XIL IYO GEERIBA KUU DIL.

(136) CAYDHINA MALE , CARUURINA KA DABA OOYI MAYSO.

(137) CIDINA UMA MAQNA, CEELNA UMA QODNA.

(138) CANAAN KA YAAB REER MA DOOJO.

(139) COLKANA WAA U TAABSIN, GEELANA WAA U HABEEN DHAX.

(140) CURYAAN CARAR LAMA YIDHAAHDO.

(141) CURAD LA QABTAY CAWRO MA DHAAFTO.

(142) CARAB LO'AAD CAWS LOOMA TILMAAMO.

(143) CULIMO JIILAAL NINKII INJIRTA KA QABTA, BAA CARRAABIYA.

## M A A H-M A A H  S O O M A A L I

(144) CAGTAADA IYO CARABKAAGABA WAA LA ILAALIYAA.

(145) CUDUD CAANO GAABSHEEN, CAGAAR MA CAYILIYO.

(146) CAARE SHABEEL, GOB CUNAAYA, IYO CURAAF NAAGOODBA CUDUDOODAY BARKADAAN.

(147) CANTUUGO GEEL GELIN BAY KU WADDAA.

(148) CARUURRI ILLAAHOW WAX ISII MATAQAAN, EE AABOW WAX ISII BAY TAQAAN.

(149) CADAABBA GEERAA II KADAY.

(150) CURAD XUMAADAY , CUDUR KAMA WEYNA.

(151) CUDURKUNA WAA KUGU SOO BOODAA,CAAFIMAADKUNA SI YARYAR BUU KUUGU YIMAADDAA.

(152) CAATADAADAA CADIIN NIN KALE KUU DHAANTA.

### D

(153) DADKU DEBNO LA XIDHIIDHIYUU LEEYAHAY, EE DABO LA XIDHIIDHIYO MALE.

(154) DUMAR WAA CARUUR RAAD WEYN.

(155) DAB AAN LAGU GUBAN, DANBASKIISA LAGAMA BAQO.

(156) DOQON IYO DAYRIBA , DEEQBOODAY KA DABA TAGAAN.

(157) DADKU WAA AB OGAA IYO ABAARI KEENTAY.

(158) DAYACAA MA NASTO.

(159) DAN IYO XARAGO, ISWAAYE.

(160) DOQONIINO MAR JOOGTA IYO TA MARWALBA JOOGTA, TA MAR JOOGTAA WANAAGSAN.

(161) DANI XISHOOD MALE.

(162) DAMEERI DHAAN RAACDAY.

(163) DEEQI WAA U DHALASHO.

(164) DAB MUNAAFAQ SHIDAY, MUSLIM BAA KU GUBTA.

(165) DOOD YAR BAA DAWO LE.

(166) DOQONI MEEL LAGU XAFIILTAMAYO, IN LAGU KALA TEGAYO BAY MOODDAA.

(167) DERISKU WAA ILAALO AAN LAGUU DIRIN.

$168) DADLA'AANA WAA LA CIDLA'OODAA, DUUNYA LA'AANA WAA LA DULOOBAA.

(169) DADKUNA HADALKUU ISKU AF GARTAA DUUNYADUNA CIDA.

(170) DOQONI GUN BAAN AHAY WAA KA XISHOOTAA.

(171) DOQONI XEER IYO XOOLO TOONA MA KEENTO.

(172) DAMEERKA AAN KU JOOGO, DHUUSADIISU MAXAY IYEELI.

(173) DOOFAARKA FICIL LA'AANTAA LAGU CADAABAA.

(174) DADKU WAA INDHO KU GARAADLE.

(175) DANTAADA IYO MADAXAAGA MIDNA LAGAMA BOODO.

$176) DIBI BEY WOW DHUTIYAA.

(177) DAD OQOON LA'AANA WAA LA QADAA, DAL OQOON LA'AANA WAA LA LUMAA.

(178) DABKII BAXAYAA DAB LAGU QABSADAA.

(179) DANI KAA ABAG.

(180) DAACADI MA HUNGOWDO.

# MAAH-MAAH SOOMAALI

(181 DAMEERO ISKU HALAYN BAY HOOYADOOD DABADA UGA NUUGAAN.

(182) DARANDOORIYAABA NAASNAASI.

(183) DAGAAL GONDAHAAGUU KA DHASHAA.

(184) DANI WAA SEETO;

(185) DOQONI SAAFTIN CARO LOOGU RIDAY , SED BURSIINYO MA MOODO.

(186) DUQSIGU DANTIISUU QUDHUNKA UGU JIRAA.

(187) DAWOCO MEESHAY MACAL IDAAD KU BARATAY,MACALUUL UGU BAKHTIDAA.

(188) DIBI AAD NAAS U DIIDEY,AFARTABA WAA KUU DIIDAA.

(189) DANTAA LAGAMA DIB JIRO.

(190) DOQONIINO WAA SHIL.

(191) DABEECAD XUMO DAD WAA KAA SAARTAA.

(192) DOQONI TAWSTEEDA WAA QARSATAA.

(193) DUQSI CAANUU KU DABAAL BARTAA , FUUDNA WAA KU GUBTAA.

(194) DUMAR WAA DAMEERO LA BILAY;

(195) DUD OO LAGUMA SOO CELIYO, QAWED OO LAGUUMA KORDHIYO, LABADABA WAAD QOOMAMAYSAA.

(196) DOQONI ALLA WAA SAHLI SED BAY U QAADATAA, NIN RAGIHINA DAYRO.

(197) DOQONTAADANA WAA LA FOGEEYAA, DOQONTA SHISHEEYAHANA WAA LA SOO DHOWEEYAA.

(198) DOQONI WAA SHISHEEYE.

(199) DOQONI WAA BUGTAA.

(200) DOQON LOOMA HIILIYO.

(201) DOQON GURIGAAGA LAMA BARO.

(202) DOQON XOOLEHEEDAA LOOGA DUCEEYAA.

(203) DOQON MILANTAY IYO GEESI MALAFSI BARTAY DHEXDOODAA MIIDAAMO KA DHACDAA.

(204) DUCO DABADEED FAATAXO LA AKHRI.

(205) DUCO NIN IIBSADEY BAA HELA.

(206) DIIN GURGUURTA IYO DIRIC JARMAADAA, DEEQ ALLA U SIMAN.

(207) DAB NIN KU JOOGSADEY DANBASKIISUU KA CARARAA.

(208) DAD CADAABEED BAL CADAABEED BAA KAA GEEYA.

(209) DADKA MADAXA KU SOCDA IYO DADKA MANJAHA KU SOCDA, MIDBA MID BUU LAYAABAA.

(210) DOQONI KUUMA HIILISO.

(211) DOQON NABARKA AGTEEDA LAGU DHUFTAA HADDAY GARANWEYDANA KORKEEDA.

(212) DADKU WAXAY CASARKII KUGU ARKAAN CISHIHII BAY KUGU CAAYAAN.

(213) DUMAR NIN DHEEHDAY KAMA DHALO.

(214) DAMEERTU GEELA HAYGA DIDISEE, QURUFQURUFTEEDAA IIGA DARAN.

(215) DOQONA LOOMA DADAALO NAAGANA LOOMA LOOGO.

(216) DAD WAA XAN DAAQ DUUNYANA WAA XAAB DAAQ.

(217) DAGAAL WAA KA DARAA, RAG IS BARTAANA WAA DOOR.

(218) DAACAA MA DILA.

(219) DABQAL LOOMA GURGUURTO.

(220) DABLA'AAN QIIQ MA YIMAADO.

## MAAH-MAAH SOOMAALI

(221) DHACDAYE MIYAAN LEEFAA.

(222) DHERI IYO NAAGATOO NA YARYARAYSI MALE.

(223) DHADHANSHAA WAALAN DHERGAANA KA DARAN.

(224) DHUUMASHO DHABARKU MUUQDAA, DHUUMASHO MAAHA.

(225) DHERIGA KARKA KULAYLKAA KA KEENAY.

(226) DHEG HADDII LA JARO DALOOLKAA HADHA/

(227) DHAR MAGAALO INTA LAGU XIDHAA WAA DHAWDAHAY, DHAL MAGAALO INTA LAGU NOQDAASE WAA DHEERTAHAY.

(228) DHIRDAAXADA CEEL CAD DAAN UGA IMI.

(229) DHURWAA AQALKAAGA LAGUMA XIDHO.

(230) DHAGAXNA MEEL DHOW BUU KU DHACAA; WARNA MEEL DHEER.

(231) DHUKH DHUKH HORE DHABANA HAYS DANBAY LEEDAHAY.

(232) DHAXAL NIN LEH LAGAMA DHAWRO.

(233) DHALAAN QAYLADI WAA QABOONADA.

(234) DHIIG LA ARAGYAABA DHADDARO HADHAY.

(235) DHIDAR XABAALO QUFAA, QUDHUN BUU UGU DHACAA.

(236) DHAGAR QABE DHULKAA U DHAQDHAQAAQA.

(237) DHICISKU INTA BIRTA LOOSOO SIDUU BAKHTIYAA.

(238) DHARKAANA WAALA DHAQAA, DHASHAADANA ASLUUBTAA LA BARAA.

(239) DHAGAX TUUJIN IYO TAABASHO WAA ISUGU MID.

(240) DHAWDHAWLEY AFKEEDOW WEDA.

(241) DHILO IYADAA KU DIIL DAXAN.

(242) DHAWDHAWDU CADUUR UMAY DHICIN.

(243) DHALAAN DHUNKASHO WAX UMA TARTO, EE DHIISHIISAA CAANO LOOGU SHUBAA.

(244) DHINACA NINKA WADAAGIISA DOONAYAANA DHANKA HILIDKA LE BUU SARA MARIYAA, NINKA XUMAANTIISA DOONAYAANA DHANKA FEEDHAHA.

(245) DHEREG FEEDHO MA DHAAFO.

(246) DHEERTA LA DHABAYANA MA LIHI DHINACA LA CADAABAYANA MA LIHI.

(247) DHUUGU GEEDAHA ISAGUNA MA CUNO, GEELANA UMA OGOLA.

### E

(248) ERGO WIXII LA SIIYANA WAA CUNTAA , WIXII LA FARANA WAA GEYSAA.

(249) ERAY GEF ILLAAHAY WAAKAA YEEDHSIIYAA, KAAGAMASE HADHO.

(250) EEDAA AAKHIRO DURUGTA.

## MAAH-MAAH SOOMLI

(251) FARO AAN DUFAN LAHAYNI WAX MA BUUGAAN.

(252) FAAL CAYTAMAY AF LAGAMA BHAWRO.

(253) FARDO GUUL HORNA MAAHA DIBNA MAAHA.

(254) FAQ FAGAARUU YIMAADAA.

(255) FARIINI WAA QAAN.

(256) FIQI LOO SHEEKA XUMEEYEY WAA DHAXAL XUMAYSTAA.

(257) FALAADH CIRKA LOO RIDEY, NIN WALBAAN FILO.

(258) FULE HABARTII MA GOBLANTO.

(259) FARDO LAYSU HAYO LAYSUMA FAANSHO.

(260) FADHI IYO FUUD YICIBEED LAYSKU WAA.

(261) FULE ISAGAABA GEESIYA.

(262) FULE NIN MAAHA FARASNA COL MAAHA.

(263) FARDAHA BOOLOOGU GAROONKAY ISKU ARKAAN.

(264) FADHI FAYDA LA, FUTOSE U ROON.

(265) FARI TOG DHEER BAY KULA XUSHAA.

(267) FULE XANTIISA MA MOOGA.

(268) FULE NIN AAN FEEYIGNAYN BAA KA LIITA.

(269) FUULAAN WAA FARO KU HAYN.

(270) FAR KELIYIHI FOOL MA MAYDHO.

(271) FULE WAA LABA GOOR DHINTAA.

(272) FARDAHA WARAABI OO XAMAR CINIQ.

(273) FULE FOOLKI KUMA LIIBAANO.

(274) FARDO JEEDAL LOOMA QARSHO.

### G

(275) GEEL DIDII LAGAGAMA HADHO.

(276) GABADHI WAA MEEL XUN JOOG.

(277) GARBA DIIRI NIN DAGUUGAN MA WEYDO.

(278) GEEL DUQDIISII DURDURISEY, AARANKIISANA MAXAA MOODEY.

(279) GEEL LABA JIR SOO WADA MAR.

(280) GARI LABA NIN KAMA WADA QOSLISO.

(281) GABADHI HOOYADEED SADDEX DHALKAY UGU TAGTAA.

(282) GEEL JIRE GEELA WAANA ISKU JIRAA, WAANA KALA JIRAA.

(283) GAMCO WADA JIR BAY WAX KU GOOYAAN.

(284) GACAN GADAAL KA BAQDAA, WAX MA GOYSO.

(285) GACANTAADU HADDAY DHUDHUB KAA GASHO , LAMA SOO DHUFTO EE WAA LAGA DHIRINDHIRIYAA.

(286) GEEL CARUURI QAADDAY MA FOGA.

(287) GAASHAAN QAAD MA HABAABO.

(288) GUDIN AAN DAAB LAHAYNI WAX MA GOYSO.

M A A H-M A A H   S O O M A A L I

(289) GEERIYI NIN AANAD OQOON BAY KU WANAAGSAN TAHAY.

(290) GEEDJOOG GARTII WAA YAQAAN, LAGA DHIMAYNA DHAXALKI WAA YAQAAN.

(291) GAR DABADEED GUGU BAAN NACAY.

(292) GOBOBI WAA QAAXO.

(293) GARDARO LAYSUGUMA GARBA YEELO.

(294) GARTA SHEEG BAA LA YIDHI EE KU DIRIR LAMA ODHAN.

(295) GEELJIRE ULBUU SOO KIRKIRTAA, MARKAASUU YIDHAAHDAA XAGEE KA GOOYAA.

(296) GEEL DOONO GEESO DHIIGLAY DHASHAA.

(297) GEESINIMO WAA CAGAHA OO DHULKA LAGUSII XEJAA.

(298) GOD QARANDIYI QODDAY, DACAWAA WARKIISA LE.

(299) GEESA GOODIR KULAYLKAA LAGU GOOYAA.

(300) GEEL DAREERAY NIN KA DAYRSHEY MA AWLIYO ALLAA.

(301) GACANTAADA GOOJA BEENADA LAMA BARO.

(302) GEED QOYAANKIISA LALA YAABO, IN GUBTAA HOOSTAAL.

(303) GEEL GEEL WEYDAARTEY, GEEDA LA'AAN BAALE.

(304) GEELBA SIBIR GODAN.

(305) GEESI ALLA MA XILO.

(306) GACANTII AANAD GOYN KARIN, WAA LA DHUNKADAA.

(307) GACANI WAA NINLE UGO'DO.

(308) GORGOR HAADDA KA WEYN.

(309) GORAYO WAA HAAD.

(310) GUUR BADANI FAKHRI BUU YEESHAA.

(311) GACANTII WAX LOOGA BARTAA LA CAWRYAA.

(312) GUS JILICSAN IYO GAR JILICSAN, MIDNA LAMA JECLA.

(313) GEEL WAA NIN GARBO ULE.

(314) GACANI WAXAY QAADAY BAY KU QAAMOWDAA.

(315) GOOR DHUUSO FAKATAY BAY FUTO ISKU ROORTAA.

(316) GEEL NIN GALAYNA OG, NIN GALADAYNA OG.

(317) GOOL KUMA DHAARAN EE GENBI BAAN KU DHAARTAY.

(318) GEEL MEELU JOOGABA , SAMSAM IYO BULAALAAD KA CABI BUU UURKA KU HAYAA.

(319) GEELOW WAX WALBA CUNTAY EE MARKAAD CIIN DAAQDAA, LAGUU YAABAA.

(320) GUDINYAHAY IMA GOYSEENE BADHKAY BAA KU WEHELIYA.

(321) GEELNA WAA GALGASHAA, RAGNA WAYS GEDIYAA.

(322) GOBI WAA MAAXADAA.

(323) GALAD MIDGAAN WAA INTA GAFUURKU QOYAN YAHAY.

(324) GEESI DHARAB KUMA JIRO.

(325) GUURKAAGA DHAAN DEGEYNA WAA LAGU BEEGAA.

(326) GABADH LABA GOLE BUUXISEY, LABA GURI MA DEGTO.

(327) GEEL JABAN OO CALAL HAYEE.

(328) GUURKU WAA SADDEX; (DAB DAB KU QABO, CADAAD MARO KU WADH, DAMEER GOMOD KA GOOSO.)

## MAAH-MAAH SOOMAALI

(329) HADDII LAGU SHEELANA WAA LAYSA SHEEGAA, HADDII LAGU SHEEGANA WAA LAYSA SHEELAA.

(330) HAL NINKII DHICIN LAHAA DHACAYO, LAMA DHICIYO.

(331) HADDAAN WAALAHAY REERKASE LEEYAHAY, SIDEE LAY GELI.

(332) HADDAAD DHIMANAYSANA DHAREERKA WAA LAYSKA DUWAA.

(333) HABAR ROOB HAYAA BADKABA INUU WADA HAYAA BAY MOODAA.

(334) HANBO BAHAL HAAD BAA LE.

(335) HAWL YARI WAA LA NAAXAA.

(336) HAWRAAREY NINBA SI KUU QAADEY.

(337) HABAARNA DHIMUU KU DHANYAHAY, DUCANA NOOLOW.

(338) HAL LABA GEEL JECEL DHEXDOODAA BAHAL KU CUNAA.

(339) HUNGURI WED MA ARKO.

(340) HAL LAAN ARKAYSAA, LAAG MA ARAGTO.

(341) HADDII GEERIYI TIMAADO, GUDA QARSIINYO LAWAA.

(342) HANTIYI XOOLO KA MACAAN.

(343) HADHUUB BUUXA HADHUUB MADHAN LAGUMA DHUFTO.

(344) HADAL BILAALE MA BUUXSHO.

(345) HADDII HUNGURI KU QAADO, TALANA WAA LAGU DARAA.

(346) HALI HADDAY DAMACDO INAY DIIDO, MAQAARKAY DALDALOOL KA EEGTAA.

(347) HADDII XXX CIDI CANAAN BEELAYSO, MEYD BAA CANAAN BE LI LAHAA.

(348) HADDII AAD MEEL TIMAADO, MOOYAALE LAMA NOQDO.

(349) HADAL WAA MERGI OO MEESHII LOO JIIDABA WAA U KACAA.

(350) HADAL INTAANU KU DILIN BAA LA DILAA.

(351) HALKA AAD KU QOYSATAABAA LAGU QALAJISTAA.

(352) HAWLI WAA ISLA DABASHO.

(353) HADDII GEERIYI KU DEYN LAHAYD, GABOW BAAN KU DEYNEYN.

(354) HALKA LAYGU FURAAYO, FEGEDNA HA JOOGO.

(355) HADAL INTUU UURKAAGA KU JIRO BUU AMMAANADAA YAHAY.

(356) HADDII DEGDEGSIINYO DOOR DHALAAN, KAADSIINYANA KIISH LACAGA BAY DHALAAN.

(357) HADMAA LAYS GARAN , HADDAAN LAYS HAYN.

(358) HADAL RUNTA KAMA RAYSTO.

(359) HAL JEENI KAMA GO'O.

(360) HADAL NIN BADSADAYNA MA WADA ODHAN, NIN YARAYSTAYNA KAMA WADA TEGIN.

(361) HALYAHAY GOOJI AMA HA GOOJIN, GEELA GU AYUUNBAA LAGUGU TIRINAYAAYE.

(362) HADDAAD TALISO OO LA DIIDO, IN LA JABO MA JECESHAHAY.

(363) HAL NIN LA TOOSANI NIN LA TUURLE.

(364) HABEEN LAGAMA HOR TAGO.

(365) HUNGURI WAX KA WEYN LA GELIYAA, WAA DILAACA.

(366) HADDAAD XILO DOONI XAMARO AG JOOG, HADDAAD XOOLO DOONI XAMARO AG JOOG, HADDAAD XARAGO DOONI XAMARO AGJOOG.

(367) HADAL WAAYEEL WAA GUUD MAR.

# MAAH-MAAH SOOMAALI

(368) HAWLI JIB CADDAYSAY.

(369) HARAG ADHI IIGA KAC MOOYIYE, IIGA DURUG MALE.

(370) HAL WALBA WIILKAY KORISAA , WEDKEEDA AH.

(371) HAL LABA MIDIGOODLE DHEELMAY, DHANA UMA FAYOOBA.

(372) HAL LIBAAX ARKAYSAA MANA DIIDO MANA GODLATO.

(373) HADAL LAGAMA WADA HADHO.

(374) HAL GAWRACANI GEEDO KAMA BAYDHO.

(375) HALBAA GEELA CUNTA OO CABAADA.

(376) HABAAR WAALID MA HADHO.

(377) HADBA SIDA LOO JABO, BAA LOO DHUTIYAA.

(378) HADDAAN TALAO LA WAAYIN, NAF LAMA WAAYO.

(379) HAANI GUN BAY KA TOLANTAA.

(380) HAL BIL QADDAY BERI KUMA DARIWEYDO.

(381) HADAL DABADII IYO HANBO DABADEED, MIDNA LAMA SUGO.

(382) HADDAAN ANIGU DARAY , ADIGUNA MAXAAD U DAADISAY.

(383) HAYNINA WAA NAGA INTA HAGARINA WAA NAGA WALLAAHI.

(384) HUNU HUNU'I HADAL MAAHA , HINBIRIIRSINA WAX ARAG MAAHA.

(385) HADAL HADAL KAMA DHEERA.

(386) HAL BOOLIYIHI NIRIG XALAALA MA DHASHO.

(387) HABAR FADHIDA LEGDINI WAX UGA FUDUD.

(388) HAWO IYO HADH GALABEED MIDNA LAMA GAADHO.

(389) HADALKAAGA AMA WAA LAGU NOQNOQDAA, AMA WAA LAGU DHEERAYSTAA.

(390) HADAL HADDAN RUNTA LAGA SHEEGIN, WAX KA DARAN BAA LAGA SHEEGAA, OO BEEN.

(391) HAWSHIISA WATE HUNGURIGIISA KAMA TAGO.

(392) HADDAAD ARAGTID NIN CALOOSHU KA LAALAADO, JID LAMA SIIYO, WAAYO KII DILEY DHIMAYAANA MOOYIYE.

(393) HADAL IYO HADLABA DUCA LA'AAN BAY TARMAAN.

(394) HALMAAN HADAL KUMA JIRO.

(395) HAY IYO HAYDI , HAY BAAN DOORTAY.

(396) HADALKU WAA LACAG LACAGNA LAYSKAMA DAADSHO.

X

(397) XOOLO DIRQI LAMA WAAYO.

(398) XOOLAHAAGA WAA LOO BARYA TAGAA.

(399) XINIINYO KUWA KUGU YAAL MAAHA EE WAA KUWA KU GARAB JOOGA.

(400) XOOLAHAAGA AMA ILAASHO 7, AMA ILAASHAN OQOOD.

(401) XAARKU HADDUU XOOLO LEEYAHAY , JILJILIC BAA LA ODHAN LAHAA.

(402) XABAAL WAX KAMA SOO NOQDAAN.

(403) XOOLO NIN DHAQAY KAMA DANBEEYAAN.

(404) XUMAAN SAMAAN BAA LAGU MAYDHAA.

(405) XOOLO QUUDHEED WAA LA QAATAA, SOOR QUUDHEEDSE LAMA QAATO.

# MAAH-MAAH SOOMAALI

(406) XASSQAAD XOOLO LAGUMA DOORASADO.

(407) XOG MOOGE XAAJO WAA DILAA.

(408) XISHOOD WAA XOOLAHAAGA WEDKOOD.

(409) XINIINYO LAYSMA DHIBAABIYO;

(410) XADHKO GEEL MA WADA XIDHAAN.

(411) XAS UL BAA LAYSKAGA DHUFTAA.

(412) XABAALO WAALID BAA XOOLO LAGA HELAA.

(413) XAGLO LA BANI XOOLO MA KEENAAN.

XXXXX

## I

(414) INDHOOLE AAD UMA TALAABSADO.

(415) ILLAAHAY DUL BADANAA OO DABEECAD SAMAA.

(416) ISHU BIRTA IYADAA ARKAYSA.

(417) ILLAAHAY HADDAAD TIDHAAHDO INANKAYGA ABTIGII IIGA DU, KAAMA AQBALO.

(418) ILLAAHOW HAA IYO MAYA MEEL HANAGAGA WADA YEEDHSIIN.

(419) ILKO DHIIG BADHNA WAA LA LIQAA BADHNA WAA LA TUFAA.

(420) IJIID AN KU JIIDEE , WAA GAMCO DAALIS.

(421) INTA NABADU JOOGTAA NINBA LABA NIN LEEG YAHAY.

(422) ILLAAHAY NINKUU DOONO INUU WAX SIIYO, YAA TAHAY MA YIDHAAHDO.

(423) INTA GAARI LA DOONAYAA, GOONBAAR WIILKEED CIIDAMIYAA.

(424) ISU ROON MA GABOWDO.

(425) ITAAL DARO WAA AYAAN DARO.

(426) ILLAAHAY NINKUU XOOLO LA MAAGO DADKOODUU SIIYAA.

(427) ILLAAHAY MA NAXO EE WAA NAXARIISTAA.

(428) INDHO GAR DARANI HADDAY OOYAAN, KUWO GARLENA MAXAAD MOODEY.

(429) ILA KU DAAQ ILA KU DAYO.

(430) ILLAAHOW GUURSAN MAAYO EE WIIL ISII, ILLAAHAY WAA YEELI KARAA, WAASE MAXAAL.

(431) ILLAAHAY WEEL YAR LO MA TOSHO.

(432) ILMA ADEERI WAA IN IS TAQAAN.

(433) INTII UURKU BUKI LAHAA ADINKU , HA BUKO.

(434) ILLAAHOW BERI HANOO WAAYIN.

(435) IS HUBAA HEESA.

(436) INAN DHALAYAABA AB DURUG.

(437) ILKO ABEESO HOOS KA XIDHIIDHSAN.

(438) INTII LAGU LOOFARO GUS KA DOOR.

(439) INTAAD QALAYSEY ANA WAA QAYBINAYEY.

(440) ILI WAXAY ARAGTO ILAALO UMA DHINA.

(441) ILI WAXAY FOGEYSABA ADIN BAA DHOWEEYA.

## MAAH-MAAH SOOMAALI

(442) ISU QAATEBA QOORTA LOO GELI.

(443) ILLAAHOW AANAY NA DIIBIN NALAGUMA KAREENE, ILLAAHOW AANAY NA BOONIN NALAGAMA KAREENE.

(444) ILLAAH IN LAGA AFBARTO , WAA LA HOOS JOOGEY.

(445) INTA BUUFIMADU TAALO BIRI MA QABOWDO.

(446) INDHAHAAGU HADDAY WAX DHEER KU TUSAAN WAX DHOW BAA LA TUBAA.

(447) IN DHEER GARATO NAAGANA KUMA JIRTO RAGNA WAA KU YARTAHAY.

(448) ISHAADUNA WAA KULA FIL DHEGTAADUNA KAA WEYN.

(449) INAADEERKAA OO AAD HIIL WAYDIISATEY, IYO NAAGTAADA OO AAD CUNTO WEYDIISATAY, LADABA KA QUUSO.

(450) INDHO DAD IYO INDHO DUGAAG WAX ISAGA DARAN.

(451) IS XUSUUSTAA ISMA XABAALO.

(452) INTAANAD FALI FIIRSO.

(453) INTA DHOGORTAADU DHANTAHAY BAA LA DHAWRSADAA.

(454) ILMUHU HOOYADOODNA WAAKU OOYAAN, AABOHOODNA WAA IL DAYAAN.

### J

(455) JIIDHKI LA HAYAA JIRIIBKA KAMA QOSLO.

(456) JIB MALA MARTAY, JIBIIN MALA CUNTAY, JABAD MALA DEGTAY.

(457) JIB MA QALOOCNA EE JIBIIN BAA QALOOCAN.

### K

(458) KAL CAANO GALEEN , XIRKI MA GALO.

(459) KAYB XUN IYANA KU MURUB LA.

XKXBXXHMEXMXXHXBHBXEEXKXBKXXHXXXHXBHXXXXXXXXXXXXXXXXXX

(460) KABXUME MA HADHO EE KABLAAWAA HADHA.

(461) KABATOLOW MA HALKAASAAB KA KUDEY.

(462) KU HUDHSIIYAA, LA HUDHSIIYAA.

(463) KITAAB ALLAA WAR QABA.

(464) KA DURUG OO KA DIGTOONOW NIN BOQRAN, HALA BOODIN NIN WUXUU DOONO FALAAYA.

(465) KOORE LA QAADYAABA SHALMADI RAACDAY.

(466) KAADI CASADAADIINA SHEEGTAY BIYANA LAGUU KORDHIN MAAYO.

(467) KU BARTAY OO KUUMA NOQDO, IYO KU BARTAY OO KUMA DAAYO.

(468) KAS NAAGOOD OO KADALOOB RAG KAAGA DAMBEEYEY, KAAB KU OGEYD MAAHA.

(469) KALA FOGAA FOOL IYO LULMO.

(470) KUU WAR KEENAA KAA WAR GEEYA.

(471) KALA FOGAA FADLIYO SACAB.

(472) KAADI BADANE WAA LOO GOGOL BADIYAA.

(473) KOR WAAYEEL WAA WADA INDHO.

# MAAH-MAAH SOOMAALI

(474) KANI GAR LE, OO KANI GAR LE.

(475) KUMA MUDAN MAHADI KU DHAN.

(476) KITAAB IYO GALKII WAA LAYSKU XURMEEYAA.

(477) KULA SHEEKAYSTE KAA SHEEKEEYA LALAMA SHEEKAYSTO.

## L

(478) LIBAAX INTA BULBUSHU KU TAAL BAHAL MA CUNO.

(479) LAF JABTAY SIDEEDII MA NOQOTO.

(480) LAX WALIBA SHILALKAY IS DHIGTAA LAGU QALAA.

(481) LABA ISKA KAA JECEL LAMA DHEX GALO.

(482) LAMA DEGO IYO GURYA SAMO MIDBA MAGECEEDAA LAGU DEGAA.

(483) LABA QAATE MA JIRO EE SADDEX QAATOW KU GO'

(484) LAFTU SIDA WAA U JABTAY.

(485) LABA KALEBA ISA SAARAY LABA TAGOOGOSE ISMA SAARIN.

(486) LAGA BARAYBA LAGA BADI.

(487) LABA IS JECEL HADDAAD ARAGTO, LEXEJECLAAN DHEX MARIN.

(488) LABA AAN IS OQOONIN ISU KEENE WAA ILLAAH.

(489) LABA MAR IS ARAGTAY , MAR LABAADNA WAA IS ARAGTAA.

(490) LABA DIBAD WADA SEEXATAY, MIDBA DOC BAA U BANAAN.

(491) LUGNA BAQE UGU JOOG LUGNA BIRIR.

(492) LAFBA LAFTA XIGTAA LAGU KABAA.

(493) LABA SI WADA DOONAYSA OO ISKU DISHAA JIRTA.

(494) LABA ABEESO KALA GOOSATAY, MIDNA GO MACAAN LAMA TEGIN.

(495) LABADII DARAA LAGU DOORANSII.

(496) LEBI IYO QALAANQALEY GEELEENABA KALA MAALAY.

(497) LABADII SIDEE YEELAA TIDHAAHDAA, SI AY YEESHO MA WEYDO.

(498) LAX WALIBA LEGEEDEY XAADHATAA.

(499) LUGO ADHI WAA LABA UU KU XAADHO IYO LABA UU KU XOQDO.

(500) LABA TAMAR DARANI ISMA TAAGEERTO.

(501) LABADII IS RABTAA IS RAACDA.

(502) LAFO MAROODI IYAGAA LAYSKU JEBIYAA.

(503) LABADII CEEDHIINKA KU QAYBSATAA, BISAYLKA ISKUMA CAWRIDO.

(504) LIBAAX MARABI MA NOQDO.

(505) LIBAAX LABA HOGOOD LAGAMA WADA KICIYO.

(506) LABADII XAQDARABA KU HESHIISAA XAQAY KU COLOOBAAN.

(507) LABA QAAWANI ISMA QAADDO.

(508) LABA GUS WADA GALAY GALADI KAMA DHAXAYSO.

(509) LA HEL LA HELBA , LA WAA BAA XIGI DOONTA.

(510) LIBAAX NIN AAN OQOON BAA HILBO KA RITA.

## M A A H - M A A H  S O O M A A L I

(511) LAABI LABA ULA

(512) LABA GEED DHEX MARAW , GEEDI DHEX MAR.

(513) LUGTU JEENIGA HADDAY DHAAFTO, WAA JABTAA.

(514) LABA AANAD LAHAYN LAYSKUMA CUNO.

(515) LIBAAX AFKII BEENI KAMA DHALATO.

(516) LABA BIYO HOOSTOOD ISKU HARAATIDAY , IYAGAA IS OG.

(517) LAYLI BIYAHA KASHIISA KU JIRUU KA DIDAA.

(518) LAMA HURAAN WAA CEEL WIYEER.

(519) LABA QOSOL KA DANBAA WANAAGSAN.

(520) LABA CAAQIL WAA HESHIIYAAN, LABA CAAQNA WAA HESHIIYAAN, XXX CAAQ IYO CAAQILSE MA HESHIIYAAN.

(521) LAGAA GUURYOO LAGUU SOO NOQOY.

(522) LABA DHAXAL ISKU HAYSA , MAXAAD ISU TIHIIN LAMA YIDHAAHDO.

(523) LABA LA HINJIYABA MID WAA HUNGURI.

(524) LIBAAX NIN GANAYNA OG NIN GALADAYNA OG.

(525) LABA QUUB KU KALA TAGTAY, QAYLA ROOR ISUMA RAACDO.

(526) LABA IS RAACDAYSAY , ISMA RAACDO.

(527) LABA WAA LA DHIBAA , LABANA WAA LA DHAWRAA, LABANA WAA LA DHAYAA.

M

(528) MUDDO MAALIN KA YAR, IYO MARTI QOF KA YAR , MIDNA LAMA ARAG.

(529) MARKA NINKA AAD WAX LA DOONAYSAANA KUGU GARANWAAYO, KAAD WAX KA DOONAYSAANA KUGU GARTO, AYEY KUUGU DARAN-TAHAY.

(530) MARKAAD MADAXA MEEL LA HESHAA , MANJAHANA LALA DOONAA.

(531) XXXX MAKA LA DILAAN U AARAA, MISE KA LASOO DAAYEY BAAN KA ABAAL GUDAA.

(532) MA CIDDI HOOSTEED BAA LAGAA HAYAA , MISE CIIL SOKEEYAA KU HAYA.

(533) MEYD MARAG MA FURO.

(534) MAXAY KU NUUGTAA AMA KA NUUGTAA, NAASO IYO FARUURYABA, LA'E.

(535) MIDHO GEED SAARAN MIDHO GUNTI KU JIRA LOOMA DAADIYO.

(536) MEEL HOO DOONEYSA HADAL WAX KAMA TARO.

(537) MEEL AANAD KU GAM'AYNIN, LAGUMA LULMOODO.

(538) MEEL LAGUGU JECEL YAHAY HADDAAD KA TAGTO, MEEL LAGUGU NECEBYAHAY BAAD TAGTAA. MEEL LAGUGU NECEBYAHAY HADDAAD KA TAGTANA, MEEL LAGUGU JECELYAHAY BAAD TAGTAA.

(539) MINDI HORE U QOOQDAY, DIB BAY U QADDAA.

(540) MADAX MUUQDA IYO MINDI AFDARAN, MIDNA LAGAMA QUUSTO.

(541) MURUQA LABA SUULE, NINBA SI KU AH.

(542) MAQASHII XXXXXXXX DUSHAADA OGOL BAA LA SIDAA.

(543) MARTIYEY WARQAB OGOW.

(544) MANJO MADAX MA DHAAFAAN.

(545) MEEL MADHAN MADAAL LAGAMA MIISO.

(546) MEEL AAR KA KACABA ATOOR FADHIISEY.

(547) MAR IBAGE ALLA HA DAGO, MAR LABAAB HADDUU IBAGANA INIGAA DAGAN.

(548) MARKA AY DAGAN TAHAY BAY ALLA TAQAAN.

(549) MALE RAG WAA NOOLI.

(550) MIDGA NI INTAY GUBA KALE NUURAYSO, BAA KEEDU QUDHMAA.

(551) MARTI JEENIGEEDU KU DHAAFSAN YAHAY, AWR BAAN KUU QALI LAHAANA WAA LA YIDHAAHDAA.

(552) MABALNA MAKHRAATI DHIGO, XXXXXXX MASAAJIDNA DHAGAX DHIGO.

(553) MAXAA LAYGAGA RAYRAYN, BERIBA LUMAYE.

(554) MEEL LEXEJECLO LAGUGU WEYDIIYEY, WAA MEEL LAGUGU QANIINEY.

(555) MEESHAAD NIN UGU DHOWAATABA NIN BAAB KAGA DHEERAATAY.

(556) MARADAADA HADDII GEEB KAA QABSADO, LAGUMA SOO BHUFTO EE WAA LAGA DHIRINDHIRIYAA.

(557) MIDIIDIN LA'AAN WAA LA MIDGOOBAA.

(558) MARKAAD XOOLAHA HAYSANA TALADAA KAA MAQAN, MARKAAD TALADA HAYSANA XOOLAHAA KAA MAQAN.

(559) MA NIN AAN WAX OQOON BAAD WAX LA QAYBSATAA, MISE BADDAAS DHURTAA.

(560) MANTAG MEEL AAB DOONAYSO KUGUMA SIMO.

(561) MILIL GUUBKII LAMA DHAYO.

(562) MAAL BAASOW MAXAAN KUU DHAQANAAYEY.

(563) MAGAALO ASAAGAANA U CAY ADIGUNA HADEYN.

(564) MAALINBA NINKAAD TAHAY BAA LAYSKA DHIGAA.

(565) MAALINTIINA ODAY ODAY BAA LOO SHIRAA, HABEENKIINA HABAR HABAR BAA LOO HOYDAA.

(566) MAALINTIINA HAREERAHAAGAA LA EEGAA, HABEENKIINA HADALKAAGAA LA GAABSADAA.

(567) MAROODIGU TAKARTA SAARAN MA ARKO EE KANKALE TA SAARAN BUU ARKAA.

(568) MA TAAGTAA BAAB GUURTAA, MISE TAAKOTAAKO.

(569) MUKULAALI QOORQABASHO BIYO KUMA CABTO.

(570) MEEL DAYAX KASOO BAXAY, XIDIGO WAX MA IFTIINSHAAN.

(571) MAAN DAD WAA MUDACYO AFKOOD.

(572) MADAX MUUQDA IYO MANJO QARSOON.

(573) MA NIN LIQAA JOOGI.

(574) MUSLIMOW RUN SHEEG, MUSLIMOWNA UGA QAADO.

(575) MAAL KAA BADAN IYO MARA KAA BADAN BAA SHISHEEYE LAGU DHEX MARAA.

(576) MARKA RAYS DHOOBMO BAA TALO DHOOBANTAA.

(577) MAALKAAGU AMA HAKAA MUUQDO, AMA HAKUU MAQNAADO.

(578) MUSAS HADDII LA FAADHO, MASAS BAA LOO TAGAA.

N

(579) NIN FAASH LIHI XAABO MA WAAYO.

(580) NIN KAA DHEER LAMA DHIRBAAXO.

(581) NIN IS FAANSHEY WAA RI IS NUUGTEY.

(582) NIN KU DILEY HADH KUUMA JIIDO.

(583) NIN AAD DHASHAY KUMA DHALIN.

(584) NIN GU KAA WEYNI IL GURUXEEDNA KAA WEYN.

(585) NIN HARRAADANI DHEGNA BIYAHAN HOO BUU KU MAQLAA DHEGNA LAMA HAYO BUU KU MAQLAA.

MAAH - MAAH SOOMAALI

(586) NIN KU JECELI WEYD KAAMA LAQANYEYSIIN WAAYO.

(587) NIN AAYADII KA GUUREY HOOYADII UMA NAGAADO.

(589) NIN KU DHACAY KUUMA XOOLO GOOYO.

(590) NIN DHINTAY KABIHIISAA KA ROON.

(591) NIN AAN KUU FURINI YAANU KUU RARIN.

(592) NIN BAAHANI MA BUKOODO.

$593) NIN BUKA BOQOL U TALI.

(594) NIN QOYANI BIYO ISKAMA DHAWRO.

(595) NIN DAMEERO RARTA AABIHII INUU GEEL LAHAAN JIREY LAMA MOODO.

(596) NIN DAAD QAADAY XUNBO CUSKEY.

(597) NINA CAADI MA BAAJO BAHALNA CEEDHIN MA DAAYO.

(598) NIN DAMEERO DABADOOD KA DEGEY, MEEL UGA TOOBOON BUU WAAYEY.

(599) NINKA IYO AWRKA HOGAANKAA U DHEXEEYA.

(600) NINKAAN WEEDHAADU GELIN WARANKAAGU MA GALO.

(601) NINBA WAXA UU JIIFIYAABUU TOOSIYAA.

(602) NIN ILKO WAAWEYNI HAD IYO GOOR INUU QOSLAYAA, LA MOODAA.

(603) NIN RAGA LAFIHIISAA , LABIYO TOBAN SANADOOD LOO XXX AAYAA.

(604) NIN BUULEY DANTII KAA OG.

(605) NIN GEELIISII LA QAABAY BADH OGOL , WAAX OGOL OO FALADH OGOL.

$606) NIN IYO NAAGTII COL IYO NABADTOONA MAAHA.

(607) NINA INTA UU KUU JIRO KUUMA SOO DHAAFO.

(608) NINKAAD JECESHAHAY AASHAA JECLOW, NECBAANDOONTEENA MOOYIYE, NINKAAD NECEBTAHAYNA AASHAA NECBOW JECLAAN DOONTEENA MOOYIYE.

(609) NIN BEEN YAQAANI WAA NIN FAL YAQAAN.

(610) NIN TUUR LIHI SIDUU U SEEXDO ISAGAA YAQAAN.

(611) NIN AAN QUUS OQOONI ISAGAA QUUSA.

(612) NIN HADDUU SEEXDO OO SOO TOOSO, WAA SIDII AAD KU OGEYD.

(613) NIN QAAWAN WAX LAGAMA QAADO.

(614) NIN AANAD SAACAD KU BARAN, SANAD KUMA BARATID.

(615) NINKII SOO JOOGSO LAGA WAAYO, SOO JIIFSAA LAGA HELAA.

(616) NIN SIGTAY MA NABAD GELIN.

(617) NINKA BIYAHA HAYA IYO NINKA BAADKA HAYA, NINBA NINKA KELE YUU UBAAHANYAHAY.

(618) NIN RAGA DAN BAA KA ADAG.

(619) NINKII MASLAXABA DIIDAA MABASHUU KU CEEBOOBAA.

(620) NINKAAN XISHOON ISHIISU WAA TIB.

(621) NINKII HAWADIISU U BEEN SHEEGTO, TAAGTIISAA U RUN SHEEGTA.

(622) NINKII TOLAYOW JANJALI.

(623) NIN QAARKII HORE MEEL U WAAYEY KA DANBE UMA HELO.

(624) NIN WAALANI KOR DANQADUU LEEYAHAY EE KAL NAXA MALE.

MAAH - MAAH SOOMAALI

(625) NAAR GALE NASIIBKIISAY NOQOTAY.

(626) NIN BEEN SHEEGAYAA, NIN CHINTAY IYO NIN DHEERAADAY BUU MARAG GASHADAA.

(627) NINBA GUGII SOO RIDIDOONE.

(628) NIN RIYOODIY RUN IYO BEENTOONA MA SHEEGIN.

(629) NIN FUDUDI WAA HAAN FUR LA.

(630) NINKA HADALKA KAA QAADAA WAA NIN KU DHACAY.

(631) NINKII QALI YAQAAN BAA QAYBIN YAQAAN

(632) NIN WALIBA WAXA UU KUGU BARTAA BUU KUGU DILAA.

(633) NIN WALIBA MADHIXIISUU HELAA.

(634) NIN DHEGALA LOOMA DHAWAAQO, NIN INDHA LA'NA LAMA TILMAAMO.

(635) NIN WAALAN WAX LOOMA SHEEGO.

(636) NIN AAN AABE LAHAYNI WAANSAN EE NIN AABE LEHOW YAA KU WAANIN.

(637) NIN WEYNI WUXUU SUGAANA WAA WED , WUXUU CUNAANA WAA DHUUNI.

(638) NIN RAGA LAYSKUMA LADO.

(639) NIN KU JECEL BAA CALAFKAA HAYA.

(640) NIN ILLAAH WAANSHEY BAA WAANSAN.

(641) NIN RAGA HADDAAB DILAYSANA WAA LA DHERGIYAA.

(642) NIN SHIRKU DHUUSAY NAXDIN UGU FILAN.

(643) NIN WALIBA UBADKIISA IYO OORIDIISA BUU QURUX LA JECELYAHAY.

(644) NIN WAALAN TOLKII BAA U MIYIR QABA.

(645) NINKII CANDHUUFTAADU GAADHO GACANTAADU HALA JIRTO.

(646) NIN KU XIGAA DHAXANTA KAA BIIYA.

(647) NIN ADHIGIISII BAHAL KU JIRO, AYAAN DARANE WAA LA YIDHAAHDAA, OROD DARANESE LAMA YIDHAAHDO.

(648) NIN WALIBA WUXUU QABO QARDHO LA IMAN DOONEE.

(649) NINKII UURKA DABANA ILLAAH BAA ARKA NINKA ISHA DABANA AADMIGAA ARKA.

(650) NIN DURBAAN QAADAY LAAQ DALBAY.

(651) NIN WALAALKI LOO XIIRAYOW SOO QOYSO.

(652) NINBA INTUU CUNO BUU CIIDAMIYAA.

(653) NIN AAN DHUL MARINI DHAAYO MALE.

(654) NIN QAYLO BARAN GEELIISA LAMA DHICIYO.

(655) NIN ANI YIDHI DAB ISKA REEB.

(656) NINBA TAAWO HAYEE.

(657) NINA HADALKIISA WAX KAMA TABO.

(658) NIN LAGU SEEXDOW HA SEEXAN.

(659) NIN WALBA WIXII LAGU ARKAA BAA LAGU SHEEGAA.

(660) NINBA WUXUU TASHADAA BUU DHEEFAA.

(661) NIN WALIBA GAMCIHIISUU BIYO KAGA BAX DHERGAA.

(662) NINKII SEEXDAA, SICII DIBI DHALAY.

(663) NIN XANTAADA XUMEEYEY KUMA NABAD GELIN/

(664) NIN BUKAA MA BILA.

(665) NIN KU GAADAY WAA NIN KAA BAQAY.

(666) NIN LA SUGAYOW ADNA YAAD SUGI.

MAAH - MAAH SOOMAALI.

(667) NIN NAGTIISII LA SHEEKAYSTAY, AMA DHAW AMA DHIRBAAX.

(668) NIN FARSAMA XUMI FARWHUU IS GOOYAA.

(669) NIN DUL BADANI DOQON KAMA TAGANA.

(670) NIN AAN AARSANI WAA ABLAAWE.

(671) NIN AAN KUU TUDHINI YAANU KUU TALIN.

(672) NIN AAD TAQAAN WAAD LA JOOGTAA.

(673) NINKAAD WAX KU QARSAN LAHAYD WAX LAGAMA QARSADO.

(674) NIN WEYN OO HADAL KA DHACAY WAA GEED QOLOFI KA DHACDAY.

(675) NINKAAD DAN QUDHA KU WADATO , LABA IYO TOBAN DANOOD BAA LOO QABTAA.

(676) NINKA KU MAAGAA HABEENKA GUURAHA AYUU KABTA FAYGEEDA KAAGA JOOGSADAA.

(677) NIN WALIBA WAXA UU YAHAY BUU KU MOODAA.

(678) NINKII II XIIRAYANA WAAN GARTAA NINKII IGU XANUUJINAYANA WAAN GARTAA.

(679) NIN WALBA KITAAB QUMANE LA YIDHAAHDO DAA QOORTA UGU JIRA.

(680) NIN WAX XADAY DENBI KELIYUU QABAA, NIN WAX LAGA XADAYNA LABA IYO TOBAN.

(681) NINKII ISHIISA LAGA ARKO , USHIISAA LAGU TUMAA.

(682) NIN WALIBA WIXII AABIHII DILAY BUU KA BAQAA.

(683) NINA GURIGIISA LAGUMA XAQ DHAWRO.

(684) NIN WAXAANU SAMAYN JIRIN SAMEEYEY WAX AANU ARKI JIRIN BUU ARKAA.

(685) NINBA MEESHA BUGTAA, ISAGAY BELBESHAA.

(686) NIN SI AANU U ORDI JIRIN U ORDAY, SI AANU U XIIQI JIRIN BUU U XIIQAA.

(687) NIN LA CEEJEY AMA XAAR AMA DHUUS.

(688) NINBA SIDII AAD KA DHIGATAA BUU KUU NOQDAA.

(689) NINKA SHIRKA DUMARKA BADSADAA, KA RAGUU KU FADEEXADOOBAA.

(690) NINA WAA BAAL SAARTAA NINA WAA BUUNBUUNISAA.

(691) NIN REER U WEYN IYO NAAS NAAGO KA UMULISAY, MIDNA SIDA UU WAX U OGYAHAY, WAX UMA SHEEGO.

(692) NIN LA TUMAY BAY TALO JIRTAA.

(693) NIN DHERGEY TALO HA WEYDIIN.

(694) NIN WIXIISII KUU DIIDEY, WAXAAGUU KUU DAAYEY.

(695) NIN AAD TAQAAN TAF DHAW.

(696) NIN AAN HADLIN HABARTIINA WAX MA SIISO.

(697) NIN KU NECEBINA XOGTAA OG, NIN KU JECELINA, XOGTAA OG.

(698) NIN SOORI KAA QAADAY WAA NIN SEEFI KAA QAADAY.

(699) NINKII TIISADA DAR YEELAA, TU KALE KU DARA.

(700) NIN RAGA HORTIISAA CAANO LOOGU BADHXAA.

§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§

(701) NIN NAFWAAYEY BAA JANOYLE.

(702) NINKII REERKIISA KAA SOORAANA WAA NIN, NINKII REERA KALE KAA SOORAANA WAA NIMANYAALO.

(703) NIN BAMEERO RARTAA , BAD LA TOY MAAHA.

(704) NIN INTUU YIBHI BIIDEY , INTUU BHALAYNA WAA DIIBAA.

(705) NIN YARI WAA NIN KUGU SOO ORDAYA.

(706) NIN FADHIGA KUGU ARKAYA LOOMA SARAJOOGSADO.

(707) NIN AAN ILLAAH DHERGIN AADANE MA DHERGIYO.

(708) NIN HABEEN OGI MAALIN MA HADHSADO.

(709) NIN MAR KU DAGAY MARNA KUU DIG.

(710) NIN ■ GAABAN CODKIINA GAABAN.

(711) NIN DAALEY DAL DHEER MA HAYBSADO.

(712) NIN MAGAALO KA DUDAYOW, YAA KU OG.

(713) NINBA TAAGTII HA TALAABSADO.

(714) NIN CAGA LA' IYO NIN CUDUR QABA-TOONA LOOMA FAANO.

(715) NIN WAALAN IYO NIN BAAHAN MIDNA FAQAAGA LAGAMA QARSADO.

(716) NIN AAN TOL LAHAYNOW HA IIHIILIN, NIN AAN WAHLAHAYNOW WAX HAY SIIN.

(717) NIN RAGANA DAAQSIN GEEL BAA WAX LAGA TUSAA, DOQONA QAANSO GURADEED.

(718) NINKII SAMRA ILLAAH BAA U SAMA FALA.

(719) NAAGO NIN AY LEGDEEN KAMA KACAAN.

(720) NAAGO NIN AY YAQAANIIN COL MA MOODAAN.

(721) NAAGO WAA BELAAYO LOO BAAHANYAHAY.

(722) NAAG XUMI SEBEN XUN KA BARAN.

(723) NAAGO WAA DHILO IYO DOORALEY.

(724) NAAGO HADDII AY GEEL WAAYAAN, NAMASTOODAY KA DAYAAN.

(725) NAAGO NIN JECELINA KAMA DHERGO NIN NECEBINA MA DAAYO.

(726) NAAGI WAATII HADALKAAGANA MAQASHA, HANBADAADANA KU SIISA.

(727) NAAG LA FURAY FADHI UMA YAAL, NIN WAX FURAYNA FADQALALOW.

(728) NABSI IYO NAQSIBA WAA JIRAAN.

(729) NAFTAA OROD BAY KUGU AAMINTAA.

(730) NAFTU WAXAY OGTAHAY BAY WEHESHATAA.

(731) NABAD GELYO BADANI WAA KU HOBDAA.

(732) NABSI XAABO KU DAY.

(733) NOOLI KULANTEE.

(734) NAAGO NIN AY KA ADAGYIHIIN, BAA KA ILMA DHALA.

(735) NAAGO WAXAY DOONAYAAN BAY DIIDAAN.

(736) NAASO HABLOOB MA CUBBAA MA CAANO.

(737) NIN LABA JIR U FUUSHAN YAHAY LAMA XANTO.

(738) NINBA TIMA XAMAR.

(739) NINKII SUN KU SIIYA, SUBAG BAA LA SIIYAA.

(740) NIN INTUU GEED KA BOODO BUU TALO, KA BOODAA.

(741) NIN AAD FADHIGA KAGA ADAGTAHAY, LAYSUMA TAAGO.

(742) NINKII MAANKAAGA SALUUGAA, MASLAXADAADA MA QAATO.

(743) NIN WALIBA KASKIISUU KORTAGAA.

(744) NIN RAGA LOOMA BUUR XULO.

(745) NINKII FIICANBA NINBAA KASII FIICAN.

(746) NIN SAMRAY SEDKIISA MA WAAYO.

(747) NINKII NINKALE HASHII GEED KU XIDHAN KA FURAA, TIISUU KU XIDHAA.

(748) NIN DHABCAALA ILLAAH KUGUMA SOO BEEGO, XXXXXX HADDUU KUGU SOO BEEGANA MID SHEEKO MACAAN KAAGAMA DHIGO. NIN FULA AH ILLAA KUGUMA DARO, HADDUU KUGU DARANA, MID KAA DHEEREEYA KAAGAMA DHIGO. NAAG AAN DHALAYN ILLAAH KUGUMA DARO, HADDUU KUGU DARANA , MID XXX GAARIYA KAAGAMA DHIGO.

XXXXXX

(749) NABARKA NINKA KUGU DHUFTA IYO KAN KUGU DHAQ-DHAQAAJIYA, KAN KUGU DHAQ-DHAQAAJIYAA XUN.

(750) NINKAAD KABA KA TOLANAYSO, KUWIISAA LA EEGAA.

(751) NINKII BAXAYA LAMA GARANWAAYO.

(752) NIN KAA DOOD ROONI DHAXAL ADOOGAANA WAA KU DHAAFIYAA.

(753) NIN TOL-LIHI WAA XADHIGIISA MA JIITE.

(754) NIN KAA XOOG ROONI, HORTAA BUU XANAAQAA.

(755) NIN DHERGEY BAA WACALA DHALA.

(756) NIN KAA CIMI BADANI KAA CUUD BADAN.

(757) NINA FUTO AAND LAHAYN KUMA XAARO.

(758) NIN ADIGA KUGU NINA OO ADIGA KUU NINA , BAA RAG KUUGU DARAN.

(759) NIN AAD SUGEYSO, AAN KUU SOO SOCON, IYO NIMAAD SOORYEYSEY AAN KAA SII SOCONIBA WAA KU DILAAN.

(760) NIN AAN WAR SUGGINI WARAN MA SUGGO.

(761) NINKA MAALIINTII GURIGIISA HADHSADA , SADDEX BAA WADA QABSADA, QOODHO MADHAN, QUNBE MADHAN, IYO QALBI MADHAN.

(762) NAAGO CALAF KUMA JOOGAAN EE CAD BAY KU JOOGAAN.

(763) NAAG NOLOL KAAGA QUUSATAY, GEERIDAADA KUMA OYDO.

(764) NAAGO TAG BAY LEEYIHIIN, EE TOL MALE.

(765) NINA MAALKIISA MANA MAALO MANA MOOGA.

(766) NIN LA YIDHI CAADADAADA DAA, WAA NIN LA YIDHI SALKAAGA KX HAKU FADHIISAN.

(767) NIN LABEEYEY, MA LABA.

(768) NAAGO NINKII XARIIR U GOGLA XANAN BAY U GOGLAAN, NINKII XANAN U GOGLANA XARIIR BAY U GOGLAAN.

(769) NIN RUN DIIDEY BEEN BAA U KAYDSAN.

(770) NIDAR LAMA GALO HADDAAD GASHANA LAMA GOGTO.

(771) NAAGO AMA USAMIR AMA KA SAMIR.

(772) NIN SHINBIRO GAADAYAA, WADHAF MA XIINSHO.

O

(773) OQOON LA'AAN DAD WAA ISUGU LUMAA.

(774) OROD IYO AYAAN , AYAAN BAA ROON.

(775) OGAAL DIIDAA NAC WAARUU LEEYAHAY.

(776) ONKODOW XEESHAA DHAC.

(777) OODO DHACAMEED SIDAY U KALA SAREEYAAN, BAA LOO KALA GURAA.

(778) OODI QAADIS IYO JIIDIS, WAA ISLA GURYA GEYN.

(779) ODAY KAA ILDHEER.

(780) OODI AB KA DHOW. (781) ODAYGA SHANSHABA XOG MAWGU DHIIBTEY. (782) OOD KAA FOGI KUMA DHAXAN TIRTO.

MAAH -MAAH SOOMAALI

(783) QOSOL QOONSIIMAAD NOQOY.

(784) QUNYAR SOCDE QODOXI MA MUDDO, HADDAY MUDDANA KUMA FOGAATO.

(785) QACDA HORE LAYGA TEGYAABA, QACDAY YEEDHAY.

(786) QURAANBA KUFUU-AN BAA ISKU FUUQSATAY.

(787) QUUD AAN JIRIN QORYO U GURO.

(788) QOODHI MA HESHIISO.

(789) QAYBIYE AMA QAD AMA QAADEY.

(790) QUDHAANJANA QOODHO QANIINTEE.

(791) QORINA KELIGII, MA BELBELO.

(792) QANDHUURTII GACALLAA HIRAANHIRTA.

(793) QOF WALBA LIX BAA LALA ABUURAA. $ ( HAWO IYO HUNGURI, GABOW IYO GEERI, FAA-IIDO IYO KHASAARE.)

(794) QAYL DAMEERAAD INTAANU BOODDO BARAN BUU DHUUSO BARTAA.

(795) QAYLO GAR DHOWEYSEE.

R

(796) RAGNA BALAN BAA XIDHA NAAGANA MEHER.

(797) RAG NINKII XANTAADA WANAAJIYA, XAASKAAGANA WAX SIIYA, BAAD UGU JECESHAHAY.

(798) RAAD AROORYO DIB LOOMA RAACO.

(799) RAG WAX ISAGA GABARO WEYN.

(800) RAG WAA ARIN KEEN IYO AQBAL KEEN.

§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§§